

Maxay Barnaamijyada Daryeelka Carruurta Ugu Baahan Yihiin Gargaar Maaliyadeed?

Nidaamka daryeelka carruurta ee Washington, sida nidaamka daryeelka carruurta ee qaranka, wuxuu ku jiray dhibaato muddo dheer ka hor intaan la gaarin cudurka faafa ee korona-fayras. Adeegyada daryeelka carruurta ma buuxin baahida oo xirfadlayaasha daryeelka carruurta ma kasban mushahar nololeed. Cudurka faafa wuxuu si weyn u aafeeyey daryeelka carruurta maadaama uu yareeyey adeegyada uuna yareeyay dakhliga adeeg-bixiyaha.

Waaxda Ganacsiga ee Gobolka Washington waxay ogaatay in dhibaataada qoysaska shaqeyaa ay kala kulmaan helitaanka daryeel caafimaad oo qiimo jaban, tayo leh ay sababto khasaaraha sanadlaha ah ee:

- 133,360 shaqaale oo ka baxa dhaqaalaha
- \$14.7 bilyan oo ah dakhli shaqsiyadeed ee ay helaan shaqaalaha WA
- \$34.8 bilyan oo ah badeecado & adeeyo
- \$1.03 bilyan oo ah dakhliga gobolka

Badhasaabka Inslee wuxuu adeeg-bixiyaasha daryeelka carruurta inay ku "muhiim ah" bilowgii cudurka aafada, haddana badankood waxay shaqeyaan iyagoo aan haysan caymis daryeel caafimaad iyo iyagoo aan haysan qalabka ilaalinta shakhsiyeed oo kufilan (PPE). Tilmaamaha caafimaadka bulshada ee la xiriiira caddadka kooxaha, PPE iyo nadaafada ayaa si weyn u kordhiyay kharashaadka bixinta adeegga daryeelka, adeeg-bixiyeayaashuna had iyo jeer waxay dhibaato kala kulmaan helitaanka sahayda lagama maarmaanka ah, sida saabuunta iyo biliijka, waxay u baahan yihiin inay si nabadgelyo ah u shaqeyaan.

Waqtigaan la joogo, maalgelinta daryeelka carruurta waxay ka yar tahay 1% ee miisaaniyadda hawlgalka WA, in kasta oo xaqiiqdu tahay in daryeelka carruurta ay tahay taageero shaqaale oo muhiim ah iyo qayb muhiim u ah waxbarashada hore ee carruurta badankood. Haddii ganacsiyada daryeelka carruurta aysan dhaqso u helin taageero lacageed, tiro aad u badan ayaa si joogto ah u xirmi doonta, taasoo sii adkayn doonto qoysaska inay helaan daryeelka ay ugu baahan yihiin inay sii shaqeyaan.



Ilaa 24% ee barnaamijyada waa inay xirmaan, qaarkood weliba si joogto ah



Ku dhawaad 30% ee xirfadleyda daryeelka carruurta ayaa shaqada laga joojiyay/loo diray fasax mushahaar la'aan ah



Adeeg-bixiyeayaashu waxay arkeen celcelis ahaan 41% hoos u dhac dhanka diiwaangelinta ah



In ka badan 40% ee barnaamijyada daryeelka carruurta ee WA waxay halis ugu jiraan xiritaan abid ah



Bixinta daryeelka carruurta oo yeraata waxay ka dhigan tahay in waalidiin yar ay shaqeyn karaan. Tani waxay burburin doontaa dib u soo kabashada dhaqaale ee Washington.

Barnaamijka Child Care Aware ee Washington wuxuu sharci dejiyayaasha ugu baaqayaa inay ka hortagaan waxyeelooloyinka dheeraadka ah ee soo gaaraya dhaqaalaha Washington, loo shaqeyayaasha, qoysaska iyo carruurta iyagoo taageero maaliyadeed oo dheeraad ah siinaya ganacsiyada daryeelka carruurta iyo:

- 1 Caymiska daryeelka caafimaadka ee la awoodi karo u fidinaya barayaasha daryeelka carruurta ee Washington
- 2 Gargaar lacageed siinaya ganacsiyada daryeelka carruurta si ay u sii furnaadaan
- 3 Ganacsiyada daryeelka carruurta u qeybinaya qalabka PPE
- 4 Ilaalintay dhammaan ilaha maalgalinee ee hadda maalgeliya daryeelka carruurta